



***The Transitional Federal Government of the Somali Republic***  
***Office of the Prime Minister***

**Ref: XRW/War-Saxaafadeed.017/07/11**

**Date: 31 July 2011**

**Fariinta Bisha Barakeysan ee Soonka ee Ra'iisul Wasaaraha Soomaaliya**  
**(Ramadan 1432 Hijra) - Muqdisho 31ka Luulyo 2011**

Ummadda Soomaaliyeed iyo dhammaan Muslimiinta Caalamka waxaan u dirayaa Hambalyo ku aadan bisha barakeysan ee Ramadanka oo ah bil fadli gaar ah u leh muslimiinta oo ay gudanayaan waajibaadka diiniga ah. Bisha barakeysan ee Ramadan oo caawa dhalatay waxaa waajib nagu wada ah inaan ku faraxno oo aan si kal iyo laab ah u soo dhoweyno.

Bishan barakeysan ee Ramadan waa bishii Quraanka Kariimka ah uu soo degay, waana bil uu EEBE furo albaabada Janada, xerana albaabada Naarta. Sidaas daraadeed, waxaa waajib nagu ah inaan ka faa'iideysano bisha Ramadan oo aan badino cibaadooyinka, isla markaana aan ka fogaano dhammaan waxyaabaha uu EEBE naga xaaraantimeeyey (ama naga joojiyey), sida xanta, dilka iwm.

Bisha Ramadan waa bil naxariis, waa bil danbi-dhaaf iyo bil naarta laga xureeyo muslimiinta. Sidaas daraadeed, waxaan ugu baaqayaa dhammaan shacabka Soomaaliyeed inay isu naxariistaan oo ay danbi-dhaaf weydiistaan EEBE.

Shacabka Soomaaliyeed waxaa maanta heysta macluul tii ugu xumeyd muddo 60 sano ka badan, oo ay keeneen roobabkii oo soo daahay iyo kooxaha ka soo horjeeda dowladda oo shacabkii ka hor-istaagay gurmaddii iyo gar-gaarkii bani'aadanimu. Sidaas daraadeed, waxaa waajib nagu wada ah inaan u wada gurmano dadka tabaaleysan, gaar ahaan barakacayaasha ka soo barakacay guryahoodii oo maanta daadsan dalka gudihisa iyo xerooyinka qaxootiga ee dowladaha deriska nala ah.

Waxaan aad iyo aad ugu faraxsanahay sida hagar-la'aanta ah ee aan dhammaanteen ugu wada istaagnay gurmadda barakacayaasha 4tii usbuuc ee ugu danbeysay, waxaana codsanayaa in dadaaladaas la sii joogteeyo oo bisha barakeysan ee Ramadan aan ku wada dhameysano innagoo gacmaha is-heysana. Shaqsi walba, guri walba, hay'ad walba waxaa waajib nagu wada ah inaan hubino in deriskeena iyo barakacayaashaba aan ka wada warqabno oo aysan dhicin in shaqsi Soomaaliyeed uusan helin afur iyo raashin uu cuno.

Waxaa sharaf weyn ah in ciidankii Dowladda ay maanta guulo waaweyn ka gaareen la dagaalanka kooxaha xagjirka ah ee diidan nabadda iyo dowladnimada. Ciidanka geesiyaaasha ah waa inaan dhammaanteen ku taageernaa soo celinta amniga iyo kala danbeynta. Ciidanka Dowladdu waxey heystaan kalsoonideyda buuxda, waxaana u ballanqaadeyana inaan garab is-taaganahay habeen iyo maalin. Dagaalka ay ku jiraan oo ah soo celinta amnigii iyo kala danbeyntii waa mid ah waajib muqadis ah oo ay ku soo celinayaan sharaftii iyo karaamadii dalka iyo diinta. Goobaha muhiimka ah ee ciidanku qabsaday waxey fursad u siineysaa in shacabka ay bisha Ramadan ku soomaan si nabad ah, isla markaana ay hay'adaha gar-gaarka gaarsiiyaan gurmaddooda shacabka tabaaleysan.

Waxaan EEBE ka baryayaa inuu bishan barakeysan ee Ramadan fadligeeda noo wada danbi dhaaf, isla markaana na dhexdhigo naxariis iyo nabad oo ummadda Soomaaliyeed meel kasta oo ay joogaan ay bisha Ramadan ku gutaan cibaadooyinka waajibka ah.

**- DHAMAAD -**